

Sidee buu ii caawin karaa elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka)?



Elder benefit specialists (khubarada manaafacaadka waayeelka) waa dad aqoon u leh manaafacaadka guud iyo kuwa gaarka ah ee dadka waaweyn.



Adeegyada elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka) waa bilaash.



Elder benefit specialists (khubarada manaafacaadka waayeelka) waxaa laga helaa macluumaad aan eex lahayn. Waxba ma iibiyaan oo ma jiraan shirkado lacag ku siiya. Ujeedkoodu waa in ay kaa caawiyaan baahiyadaada.



Qofka kuu ah Elder benefit specialists (khubarada manaafacaadka waayeelka) ayaa kuu dhowraya macluumaadkaaga shakhsiga ah.

La hadal deegaankaaga elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka)



Nagala soo xiriir:



Sawiro calaamadda
FindMyADRC.org



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

P-03712FSO (03/2025)

Barnaamijka Khabiirka Manaafacaadka Waayeelka

(Elder Benefit Specialist Program)

Bilaash | Eex-la'aan | Qarsoodi





Yaa la kulmi kara elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka)?

Elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka) wuxuu kugu caawinayaa:

- Kordhinta dakhligaaga.
- Bixinta daryeelkaaga caafimaadka iyo daawooyinka.
- Yareynta kharashkaaga.

Inay lacag kuu baaqato. Inaad u noolaato si madaxbannaan.

Elder benefit specialists (khubarada manaafacaadka waayeelka) waxay hubinayaan barnaamijyada iyo fursadaha ay lacag kuugu baaqaneyso oo waxay ilaalinayaan madaxbannaanidaada.

Hel caawimaad ah waxyaabaha soo socda iyo ka badan.

- **Dakhliga naafada iyo hawlgabka**, sida Social Security (Lacagta Hawlgabka) iyo Naafada, Supplemental Security Income (Dakhliga Kabista Hawlgabka ama SSI), iyo uruurinta deynta
- **Kharashaadka**, sida FoodShare, internetka, iyo biilasha taleefanka
- **Ceymiska caafimaadka**, sida Medicare, Medicaid, SeniorCare, iyo barnaamijyada kale ee bixiya kharashka daryeelka caafimaadka
- **Guryaha iyo korontada**, sida goyntaadeeg, ka-saarid guri, xuquuqda kireystaha, iyo barnaamijyada kaalmada dhaqaalaha

Sidaad ku heleso caawimaad

Hel talada khabiirka.

Elder benefit specialist (khabiirka manaafacaadka waayeelka) ayaa ku caawin kara:

- **In laguugu qareemo** magacaaga.
- **Inaad codsato** barnaamijyo ay kuu baaqaneyso lacag.
- **Inaad isku eegto waxyaabaha** ceymiska caafimaadka, barnaamijyada manaafacaadka, ama wixii arrin xal u ah.
- **Xareynta racfaanka** marka lagu diido daryeelka caafimaadka, lacagta daawada, ama manaafacaadka kale.
- **In lagu gudbiyo qareen** markaad u baahato.

*"Khabiirka manaafacaadka iguma caawin racfaankeyga oo keliya, waxaa la i baray xuquuqahayga si aan nafteyda ugu hadli karo."
—Macmiil*